ADAMH Guddida sare ee qaabilsan Daroogada, Maandoorshaha iyo Caafimaada maskaxda (Alcohol, Drug And Mental Health Board Of Franklin County).

Ogeysiis Gaar ah (Privacy Notice).

Ogaysiis kani wuxuu qeexayaa sida akhbaarta cafimaadka ee kuu gaarka ah loo isticmaali lahaa ama shaaca looga qaadi lahaa iyo waliba sidii aad u heli lahayd akhbaartaas iyada ah ee fadlan si taxadar leh u akhri.

Ilaalinta sirtaada gaar ahaaned ee ku saabsan arimaha la xiriira caafimaadkaaga waa mid aad noogu wayn oon dhab ahaantii aad isaga xil saarno si ay masuuliyad wayni ku dheehan tahay. Haddii aannu nahay ADAMH waan fahamsannahay in arimaha la xiriira naftaada iyo cafimaadkaaguba ay aad muhiim kuugu yihiin. sidaas darteed, ayaan waxaan balan qaadaynaa in arimahaasi aysan farahayaga ka bixin sida arimaha ay ka mid yihiin xaaladahaagii hore, kuwa hadda, kuwa iman doona iyo daawaynta iyo daryeelka caafimaadkaagaba.

(XILKA KA SAARAN ADAMH'S ILAALINTA WARKA CAAFIMAAD QOFKA (ADAMH'S DUTY TO SAFEGUARD YOUR HEALTH INFORMATION).

Sharcigu wuxuu na farayaa:

- in aan ilaalino sirta ku saabsan warka cafimaadkaaga.
- In aan ku siino ogaysiintan ku saabsan shaqooyinkayaga sharciga iyo tusaaslooyinka illaanlinta sirtaada.
- Raacno tusaalooyinka ku xusan ogeysiintan.

Ogesiiskani wuxuu qeexayaa siyaabaha aanu u isticmaali karno ama shaaca uga qaadi doonno arimaha caafimaadkaaga si ay noogu suurto gasho in lagu aanu u daaweeyno, ama lacag bixinta, hawsha daryeelka caafimaadkaaga iyo waxii kale ee loo baahdo ee sharcigu noo ogolaado. Waxa kale uu ogeysiiskani kuu sheegayaa waxii aad xuquuq u leedahay iyo masuuliyada naga saaran kaydinta wararka caafimaadkaaga.

WAX KA BEDDALKA OGEYSIISKAN (CHANGES TO THIS NOTICE):

Waxxanu xaq u leenahay in aannu wax ka beddelno qaabka aanu daryeelno arimaha sirta ah eeaannu sheegnay ogeysiiskan. Haddii ay jirto in wax aannu ka bedelno, Wixii isbedal ah waxaannu gelin doonnaa bogga aannu ku leenahay netka. Fadlan wixii faahfaahin ah oo arimahaas ku saabsan booqo bogga (www.adamhfranklin.org). Waxaad ka codsan kartaa nuqulka cusub madaxda ADAMH.

HABKA AANU U ISTICMAALI DOONNO AMA SHAACA KA QAADI DOONNO WARKAAGA CAAFIMAAD IYO XADIDKA ISTICMAALKA ADIGA OON LAGU WAR GELIN. (HOW WE MAY USE & DISCLOSE INFORMATION ABOUT YOUR HEALTH & LIMITS ON USE WITHOUT YOUR AUTHORIZATION.)

Fadlan ogoow hadii lagaa daweynayo arimaha ay ka mid yihiin Maandooriyaha ama daroogada ama madax xanuun iwm waxaa lagu waydiin doonaa in aad saxiixdo wixii waraaqaa ee u baahan saxiixaaga. Si aanu u fududayno hawlaha ku saabsan lacag bixintada.

Waxaan kaloo u isticmaali karnaa ama shaaca ka qaadi karnaa arimaha ku saabsan caafimaadkaaga sababa jira awgood. Marka laga reebo arimo dhawra oon xaq u lahayn in aan shaaca ka qaadno sida arimaha la xiriira daawayntaada lacag bixintaada iyo arimo kaloo ku saabsan hawlo daryeelka caafiaadkaaga ah. Wixii intaas ka baxsan waa in aan helnaa qoraal xagaaga ah oo noo ogolaanayo in aanu isticmaalno.

Haddaba haddii aanu la wadaagno arimahaaga caafimaad urur ka baxsan hay'adayada si ay u gutaan ujeedo gaara iyagoo magacayaga ku hadlaya waa in aan jihooyinkaas la galnaa heshiis ku saabsan xaqa aad u leedahay in aan marnaba meel looga dhacayn xuquuqdaada gaarka ah.

QAABKA AAN U ISTICMAALI KARNO AMA AAN UGA WARBIXIN KARNO ARIMAHA KU SAABSAN XAALADAADA CAAFIMAADKA ADIGOON LUGU WAR GALILIN.

Qodobadan soo socda waxay cadaynayaan siyaabaha kala duwan ee aan u isticmaali karno amaba uga war bixin karno arimaha ku saabsan xaaladaada caafimaad. Anagoo qeexi doona qodab walba macnihiisa, ayaan waxaan idiin siin doonaa tusaalooyin ku saabsan arimahaas. In kastoo guud ahaan aanan soo koobi karayn, ha yeeshee waxaan isku dayi doonaa in aan idiin taabano nuxurka qodobadaan aan kor ku soo xusnay.

QAABKA DAAWAYNTA (TREATMENT):

Inkastoo hayada ADAMH aanay bixin daawooyin toos ah, hadana waxay isticmaali karaan ama adeegsan karaan arimaha ku saabsan xaaladaada caafimaad, ayagoo kaashanaya haydaha adeeg bixiyayaasha ay qandaraasyada la galeen oo kaliya. Taasoo macnaheedu yahay sare u qaadida tayada adeegyada la xiriira caafimaadkaaga guud.kamana koobna wax ka baxsan xaaladaada caafimaad sida Daawaynta, caafimaadka jirkaaga, xaalad caafimaadkaagii hore,daawooyinkaad u baahantahay iyo xaaladaada dhaqaale iwm.waxaan kaliya oo gudbin karnaa xaaladaada caafimaad hadii ay timaado arin degdeg ah la soo gudboonaato arimo ku saabsan xaaladaada caafimaad.

QAABKA LACAG BIXINTA (PAYMENTS):

Ayadoo la tixraacayo arimahaaga caafimaad ayaa hay'adani waxay xaq uleedahay in ay la xiriirto hay'adaha ay khusayso arimahani iyo gudiga hayada ADAMH si loo go aamiyo in aad xaq u leedahay adeegyada caafimaad bulshada ee ay dawladu maalgeliso sidas darteed, waxaan maaraynkarnaa arimaha ay kamid yihiin uqalmida, qaab bixinta lacagta, diiwaangalinta iyo lacagbixinta la xiriirta adeegyada caafimaadkaaga, iyadoo Medicaid ka iyo dhawr hay'adood oo isutagey ay masuul ka noqon doonaan bixinta adeegyada aan kor ku xusnay. Arintu si kastaba ha ahaatee,si loo fududeeyo qaabka lacag bixinta arimaha ku saabsan adeegyada daryeelka caafimaadkaaga, waxay hay'adaha adeeg bixiyaashu kaa codsan doonaan in ay kaa helaan ogalaansho buuxda oo ku saabsan arimahaaga caafimaadka si ay u helaan wixii lacaga ee ku baxay adeegyadii caafimaad ee laguu qabtay.

HAWLKALGA ADEEGGA CAAFIMAADKA (HEALTH CARE OPERATIONS):

ADAMH waxay u isticmaali kartaa arimaha la xiriira caafimaadkaaga sii ambaqaadida ama wadida hawlaha ganacsiga. Tusaale ahan, waxaan qiimaynaa tayada adeegyada luguu qabtay. Waxaan kaloo warbintaas u gudbinaa xisaabiyaasha ama qareenada noo qaabilsan hawlahaas in loo adeegsaday sidii loogu talo galay iyo in kale. Hase ahaatee, qiimaynta iyo warbixinta xisaabiyaasha badanaaba laguma xuso magaca qofka loo adeegayo. Waxaase dhici karta in arimahaas si gaara loola wadaago hay'adaha bixiya adeega daryeelka caafimaadka ee aan qandaraaska la galno si loo xaliyo cabashada ka timaada gaar ahaan qofka loo adeegayo, guud ahaana adeegyada la xiriira u adeegida qofka. Kamana koobna wax ka baxsan xaaladaada caafimaadka sida daaweynta,

xaaladda caafimaadka jirkaaga, xaalada cafimaadkaagii hore, daawooyinka aad u baahantahay iyo dhaqaale ahaan xaaladaada guud iwm. Waxaa kaloo laysku dayi doonaa in la hello arimaha la xiriira caafimaadkaaga iyadoon marnaba qaanuunka laga baxayn. Qaanuunku wuxuu noo ogolaanayaa in la isticmaali karayo arimaha la xiriira caafimaadkaaga iyada oon ogolaansho buuxda xagaaga laga hellin iyadoon lagarab marayn wuxuu qaanuunku kuu jidaynayo ama kuu ogolyahay.

HIRGELINTA SHARCIGA IYO XUKUUMADDA (LAW ENFORCEMENT AND GOVERNMENT).

ADAMH waxay xaq u leedahay in ay isticmaasho arimaha la xiriira caafimaadkaaga una gudbiso warbixintaada cid alaale iyo cidDii soo codsata iyadoo la fulinayo amarka maxkamadda arintaas codsatay oo kaliya. Taasina waxay dhici kartaa marka qofka lagu tuhmo danbiyo waaweyn. Sidoo kale haddii qofka maskaxda laga hayo waxaa akhbaartiisa loo gudbin karaa cidii codsata ayadoo la ixtiraamayo codsiga saraakiisha u xilsaaran xoojinta qaanuunka danbiyada lagu tuhmayo qofkaas awgeed. Sidoo kale waxaa wararkaas loo gudbin karaa saraakiisha milatariga goobaha dhaqancelinta,iyo Xukuumadaba arimo nabadgelyo awgeed. Waase haddii qaanuunku arintaas qaanuunku codsado.

XARAKAAD CAAFIMAAD (HEALTH OVERSIGHT ACTIVITIES)

ADAMH waxay u isticmaali karta arimaha la xiriira caafimaadkaaga baaritaan, maarayn iyadoo la waafajinayo sida qaanuunka qabo. Waxaana taa looga dan leeyahay in la qiimeeyo adeegyada guud ee ay bixiyaan hayadda u qaabilsan daryeelka caafimaadkaaga.

CAAFIMAADKA BULSHADA (PUBLIC HEALTH)

ADAMH waxay u isticmaali kartaa ama la wadaagi kartaa arimaha la xiriira caafimaadkaaga masuuliyiinta sare iyagoo iska kaashanaya arimo ay ka mid yihiin danbiyada ku saabsan qoyska iyo wax yeelaynta mushtamaca.

KUWA KU SHUQUL LEH DADKA DHINTA (CORONERS)

Sidoo kale adamh waxay akhbaartaada la wadaagi kartaa qolooyinka loo yaqaano coroners.

BAARIS CILMIYAYSAN (RESEARCH)

ADAMH waxay u isticmaali kartaa arimaha la xiriira caafimaadkaaga ujeedooyin ku saabsan cilmi baaris,iyadoo la tixraacayo qaanuunka adamh tu marnaba ma daabici doonto arimo la xiriira sirtaada gaarkaa ilaa xagaaga ogolaansho laga hello.

ISTICMAAL IYO SHAACA KA QAADID AAD DIIDI KARTO (USES AND DISCLOSURES TO WHICH YOU MAY OBJECT)

ADAMH waxay daaha ka qadi kartaa in yar oo ka mid ah wararka la xiriira caafimaadkaaga iyadoo la wadaagi doonta hay'adda u qaabilsan daryeelka caafimadkaaga. Anagoo ku war galin doona kuna siin doona waqti kugu fillan.hadii aadan dood ka qabin arimahaan hoos ku qoran.

- Dadka ay ka mid yihiin qoyskaaga, asxaabtaada iyo cid allaale iyo cidii lug ku leh daryeelka caafimaadkaaga ama lacag bixinta daryeelka la xiriira caafimaadkaaga.
- Anagoo tix raacayna arimahaan kor ku soo xusnay,haddii ay timaado arin deg deg ah oo ku saabsan caafimaadkaaga fursad uma helli doontid in aad ka hortimaado shaac ka qaadida daryeelka caafimaadkaaga ka hor intaan lugu daaweyn.
- Sidoo kale dadka ay ka midyihiin qaraabadaada, asxaabtaada iyo cid allaale iyo cidii lug ku leh daryeelka caafimaadkaaga ee ku saabsan deegaankaaga,

XUQUUQ KHUSAYSA WARKAAGA CAAFIMAAD (YOUR RIGHTS REGARDING INFORMATION ABOUT YOUR HEALTH)

Bukaan socodku wuxuu xaq u leeyahay dhamaan arimaha aan hoos ku xusi doono.

CODSASHO XADIDAAD(TO REQUEST RESTRICTIONS):Sidaan horay u soo sheegnayba, qofku wuxuu xaq u leeyahay in uu waydiisto in arimaha daryeelka caafimaadkiisa aan cid walba lala wadaagi Karin, isagoon ogalaansho laga hellin. Hayeeshee ADAMH ma balan qaadi karto arintaasi haddii qaanuunku waydiisto.

DOORASHO HABKA LAGUULA SOO XIRIIRO (TO CHOOSE HOW WE CONTACT YOU):Waxaad xaq u leedahay in aad hesho liis kuu sheegaya goorta, qofka iyo nooca ku Saabsan arimahaaga caafimaadka ee shaaca looga qaaday cidii codsatay.

HAADAD U BAHANTAHI FAAHFAAHIN (TO FIND ABOUT DISCLOSERS)
Marka laga reebo arimaha ay ka mid yihiin arimaha caadigaa ee la xiriira daaweyntaada, bixinta lacagaha ku saabsan daryeelka caafimaadkaaga,wararka laguu soo gudbiyo adigiyo dadka kula xiriiraba, waxaa kaloo akhbaartaas ka mid ah kuwa lala wadaago melaha ay khusayso sida arimaha la xiriira nabad sugida qaranka iyo qaanuun ilaaliyaasha waxaan kuu soo gudbin doonaa qoraal ku saabsan arimahaan kor ku soo sheegnay mudo lixdan cisho gudahooda iyadoon lix sano wixii ka badan aadan heli doonin-laakiin waa in aysan ka danbayn april 2003.mana jiri doonto wax lugu soo dalici doono mudo sanad gudihiisa. Balse waxaa jiri doona dalacaad yar haddii codsigaagu soo noqnodo.

U FIIRSASHO IYO NUQLI (TO INSPECT AND COPY).Bukaan socodku wuxuu xaq u leeyahay in uu xog ogaal u noqdo qaabka aan u maamulno daryeelka caafimaadkaaga. Waxaana badanaaba arimahaas ka mid ah diiwaanka lacag bixintaada.adigoo arintaas qoraal ahaan nooga codsanaya waxaana kuugu soo jawaabi doonaa mudo 30 cisho gudahooda.haddiise la diido keyskaaga waxaan soo qori doonaa warqad aan kuugu sharixi doono sababaha laguugu diiday. Waxaadse xaq u leedahay in aad racfaan dib u

qaadat. Adigoo codsanaya nooca wararka aad jeceshahay in aan koobi ahaan kuugu oo dirno.

BURIN OGOLAANSHO (TO REVOKE AN AUTHORIZATION):Haddii bukaan socodku uu saxiixo in aan xaq u leenahay shaackaqaadida arimaha la xiriira caafimadkiisa,waad ka noqon kartaa wax allale iyo waxaad horay u saxiixday ado na soo war galinayo.

CODSASHO BEDELAAD WARKAAGA (TO REQUEST AMENDMEMT OF YOUR INFORMATION): Haddii aad rumaysan tahay ama ay jiraan wax khalada ama waxyaabo ka maqan faylkaagii aan haynay waxaad xaq u leedahay inaad noo soo qortid qoraal.anagoo sixi doona faylkaaga.waxxana aan kuugu soo jawaabi doonaa ilaa 60 casho taasoo aad ku heli doonto codsigaagii.waanu diidi doonaa codsigaaga haddii aan hello waxyaabahaan soo socda.

- mid cad oo dhamaystiran.
- Taa soo ah mid aanaan abuurin.
- mid aan kamid ahayn xaaladaada caafimaad ee aan kaa hayno.
- mid aan ka mid ahayn xaaladaadii caafimaad ee loo ogolaaday baaritaan.

Haddiise aan diidno codsigaagii si loo saxo wararka ku saabsan arimaha la xiriira caafimaadkaaga waxaan kuugu soo bandhigi doonaa qoraal anagoo arintaas cadaynayna sababaha luguugu diiday.waxaadna arintaas ka qaadan kartaa racfaan aad in wax laga badalo ku codsanayso, haddiise aan ogolaano keyskaaga waxaad xaq u leedahay in lagugu war galiyo wixii is badal ah ee yimid, sidoo kale waxaan arintaas wargalin doonaa jihooyinka kale ee ay khusayso. Fadlan u qor cabashadaada ku saabsan xaaladaada caafimaad.cinwaankaan hoos ku qoran.

Client Rights Officer
ADAMH Board
447 E. Broad St.
Columbus Ohio 43215.

SIDA AAD U GUDBIN LAHAYD CABASHO (TO FILE A COMPLAINT)

Kaama aar goosan doono haddii aad gudbiso cabato. Haddii aad rumaysan tahay in xuquuqdaadii gaarka kuu ahayd ay ku xad gudubtay ADAMH, waxaad u gudbin kartaa cabasho qoraal ah.

ADAMH

Client Rights Officer
ADAMH
447 E Broad St.
Columbus, OH 43215
Phone 614-224-1057

Xafiiska Xuquuqda Rayidka(With the office for Civil Rights)

Region V Office for Civil Rights
U.S. Department of Health & Human Services
223 N Michigan Ave. Suit 240
Chicago, IL 6060.
Phone: (312) 866-2359
Email: OCRComplaint@hhs.gov

XAQ U LAHAANTA NUQLI OGEYSIISKAN (RIGHT TO COPY OF THIS NOTICE)

Qofka wuxuu xaq u leeyahay in uu hello warqad koobi ah xili allaale iyo xiliguu doono, sidaas darteed, wixii faahfaahin dheeraad ah ee aad u baahan tahay booqo cinwaankan hoos ku qoran (www.adamhfranklin.org)

FAAHFAAHIN WAR (FOR MORE INFORMATION)

Haddii aad qabto wax suaala oo ku saabsan sida aan u maamulno arimaha ku saabsan caafimaadkaaga iyo sirtaada khaaska kuu ah fadlan la soo xiriir cinwaankan ama Telefoonkan hoos ku qoran oo ah 614-224-1057.